Bridging Refugee Youth & Children's Services

This document is provided by the BRYCS Clearinghouse.

# 40 Developmental Assets- Somali (Afartanka Kaabeyaasha Horumarinta ee Maxadka Baadhista)

Search Institute

Minneapolis, MN

Reproduced with permission of Search Institute.

© 2004

BRYCS is a project of the United States Conference of Catholic Bishops/Migration and Refugee Services (USCCB/MRS)
1-888-572-6500/ info@brycs.org/ www.brycs.org

Family & Children's Service

Hay'ada U' adeega Qoyska iyo Caruurta

# Afartanka Kaabeyaasha Horumarinta ee Maxadka Baadhista

## 40 Developmental Assets in Somali

Afartanka Kaabeyaasha Horumarinta ee Maxadka Baadhista, ee socda waa aasaska dhismaha horumar caafimaad leh ee caawiya dhalinyaradda si ay ugu barbaaraan caafimaad, daryeel iyo xilkasnimo.

| | Nooca Kaabaha (Category) | Magaca Kaabaha Iyo Qeexintiisa (Asset Name and Definition) |
|---|---|---|
| Kaabeyaasha Debeda (External Assets) | **Taageero** (Support) | 1. **Taageerada Qoyska**-Qoysku wuxuu gudbiyaa kalgacal heer sare ah iyo taageero.<br>2. **Wadaxidhiidka anshaxa leh ee qoyska**-Qofka yar iyo waalidkeed/waalidkiis si anshax leh ayay u wada xidhiidhaan, sidoo kale qofka yar wuxuu u ogol yahay talo iyo wano ka raadsado waalidka.<br>3. **Ehelnimada waayeelka**-Qofka yar wuxuu tageero ka helaa sadex qof oo waayeel ah ama in ka badan oo aan waalidkiis ahayn.<br>4. **Deris (Sabo) xanaano** leh-Qofka yar wuxuu ku barbaaraa deris xanaaneeya.<br>5. **Dugsi cimilo xanaano leh**-Dugsigu wuxuu gudbiyaa cimilo (bay'ad) xanaano iyo dhiirigelin leh.<br>6. **Isku-taxalujinta dugsiga ee waalidka**-Waalidku wuxuu isku taxalujiyaa gargaarka qofka yar sidii uu dugsiga ugu quulaysan lahaa. |
| | **Awood siinta** (Empowerment) | 7. **Bulshadu waxay qiimaysaa dhalinyarada**-Qofka yari wuxuu rumaysan yahay in waayeelka bulshadu qiimeeyaan.<br>8. **Dhalinyaradu waa waxtar**-Dadka yaryar waxa bulshada laga siiyaa door fiican.<br>9. **Adeega dadka kale**-Qofka yari wuxuu bulshada u adeegaa saacad ama in ka badan todobaadkiiba.<br>10. **Badbaadada(nabadgelyo)**-Qofka yari wuxuu badbaado ku dareema guriga, dugsiga iyo sabada (deris). |
| | **Xuduuda iyo filashada** (Boundaries and Expectations) | 11. **Xuduuda Qoyska**-Qoysku wuxuu leeyahay qawaaniin cad iyo ciqaabo, wuxuuna waajib iska (daneeyaa) qofka yari meesha uu ku suganyahay.<br>12. **Xuduuda Dugsiga**-Dugsiga wuxuu leeyahay qawaaniin cad iyo ganaax.<br>13. **Xuduuda sabada**-Derisku wuxuu xil iska saaraa korjoogidda dhaqanka (anshaxa) qofka yar .<br>14. **Waayeelku waa tusmada anshaxa**-Waalidiinta iyo waayeelka kale waa tusmada anshaxa.<br>15. **Ku dayashada anshaxa asxaabta**-Qofka yar, asxaabtiisu waxay muujiyaan dhaqanka toosan.<br>16. **Ka filashada samaanta**-Waalidiinta iyo barayaashu waxay qofka yar ku dhiiriyaan inuu dadaalo. |
| | **Waqtiga oo si wax-u'oo'leh loo adeegsado** (Constructive Use of Time) | 17. **Hawlaha curinta leh**-Qofka yari wuxuu sadex saacadood ama ka badan todobaadkii waqtigiisa siiyaa duruustiisa ama tababar muusiiqada, masraxa, ama farshaxanka kale.<br>18. **Mashruucyada dhalinyarada**-Qofka yari wuxuu sadex saacadood ama ka badan todobaadkii waqtigiisa siiyaa ciyaaraha, gole-yaasha, ururada dugsiga iyo/ama ururada bulshooyinka.<br>19. **Ururada Diinta**-Qofka yari wuxuu todobaadkii hal saac ama ka badan siiyaa hawlaha haydaha dienta.<br>20. **Waqtiga guriga**-Qofka yari wuxuu asxaabta la maqanyahay "iyadoo wax gaar ah oo muhim ah aan la qabanayn" laba habeen ama in ka yar todobaadkii. |
| Kaabeyasha gudaha (Internal Assets) | **U'qun-sanaanta wax ba-rashada** (Commitment to Learning) | 21. **Hiyi ku haynta natiijada**-Qofka yari wuxuu hiyiga ku hayaa inuu dugsiga ku guuleysto.<br>22. **Ku mashquulsanaanta dugsiga**-Qofka yari wuxuu si buuxda ugu mashquulsanyahay waxbarashada.<br>23. **Wax-ku-dhigashada guriga**-Qofka yari wuxuu isu xaadiriyaa inuu ugu yaraan hal saac guriga wax ku dhigto maalin kasta oo dugsiyeed.<br>24. **Ku-xidhnaanta dugsiga**-Qofka yari wuxuu daneeyaa/danaysaa dugsiga.<br>25. **Wax-akhris madadaalo**-Qofka yari wuxuu todobaadkii iskaga madadaashaa sadex saacadood oo wax akhris ah todobaaadkii. |
| | **Anshaxa qiimaynta** (Positive Values) | 26. **Xanaanaynta**-Qofka yari wuxuu qiimo weyn siiyaa gargaarka dadka kale.<br>27. **Sinaanta iyo garsoosrka bulshada**-Qofka yari wuxuu qiimo weyn siiyaa fidinta sinaanta iyo yaraynta gaajada iyo saboolnimada.<br>28. **Toosnaanta**-Qofka yari wuxuu ku dhaqmaa xaqiiqda waxuuna ku adagyahay waxa uu rumaysanyahay/rumaysantahay.<br>29. **Daacadnimo**-Qofka yari "wuxuu sheegaa runta xitaa marka aanay fududayn."<br>30. **Xilqaadka**-Qofka yari wuxuu ogolaadaa wuxuu uu shakhsiahaan uga mas'uul yahay.<br>31. **Is-xakamaynta**-Qofka yari wuxuu rumaysanyahay inaanay muhim ahayn inuu hammi ahaan kacsanyahay ama aanu khamriga iyo mukhaadaraadka kale isticmaalin. |
| | **Aqoonta bulshada** (Social Competencies) | 32. **Qorshaynta iyo go'aanminta**-Qofka yari wuxuu yaqaanaa siduu wax u sii qorshaysto waxna u kala doorto.<br>33. **Aqoonta xidhiidhka dadka kale**-Qofka yari wuxuu leeyahay caadifad, dareen, iyo xirfadaha saaxiibnimada.<br>34. **Aqoonta dhaqanka**-Qofka yari wuxuu leeyahay la-xasilka dadka ku kala duwan dhaqanka/qoomiyadda/qabiilka.<br>35. **Xirfadda u-adkaysiga**-Qofka yari wuxuu u adkaysan karaa jiidashada anshaxa-xun ee asxaabta iyo dhacdooyinka halista ah.<br>36. **Xallinta iska-hor-imaadka si nababgelyo leh**-Qofka yari wuxuu raadiyaa inuu iska-kor-imaadka u xalliyo si deggan. |
| | **Tilmaan anshax** (Positive Iden-tity) | 37. **Kartida shakhsi ahaaneed**-Qofka yari wuxuu dareensanyahay inuu isagu/iyadu xakamayn karto "wixii aniga igu yimaada."<br>38. **Qiimaynta nafta**-Qofka yari wuxuu muujiyaa in naftiisu qiimo leedahay.<br>39. **Dareenka ujeedada**-Qofka yari wuxuu muujiyaa in "noloshiiso ujeedo leedahay."<br>40. **Aragtida fiican ee waayaha danbe ee shakhsiahaaneed**-Qofka yari wuxuu ku kalsoonyahay aayihiisa/aayaheeda danbe. |

Afartanka Kaabeyaasha Horumarinta , waxaa soo saaray Maxadka Baadhista, © 1997. Turjumidda Soomaliga waxaa u qoray Hay'ada U' adeega Qoyska iyo Caruurta, Faarax Cabdi. Haddii aad u baahato naqliyo kale oo turjumaddan boqo boga intarnatka www.famchildserv.org . Kaabayaashan waxa kaliya ee loo daabacankaraa waxba-rasho, iyo wixii aan ganacsi ahayn oo kaliya.

*Original 40 Assets framework developed by Search Institute, © 1997 Search Institute. Translation into Somali done by Farah Abdo for Family & Children's Service. For additional copies of this translation, go to www.famchildserv.org. This tool may be reproduced for educational or non-commercial uses only.*